

Tillaabooyin cusub oo heer qaran ah oo lagu xakamaynayo faafidda cudurka

Dawladdu waxay go'aamisay in la soo rogo tillaabooyin badan oo heer qaran ah kuwaas oo cudurka looga hortagayo, si culayska looga yareeyo adeegga caafimaadka- iyo daryeelka, loona hakiyo oo loo xaddido omikoroon.

Tillaabooyinku waxay ku salaysan yihiin taladii laga helay Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha.

– Waxaan aad u jeclaan lahayn in safmarku naga dhammaado. Laakiin hadda xaaladdu waa mid aad halis u ah, oo keenaysa in aan tillaabooyin cusub hirgelinno si aan cudurka u xakamayno. Sidaas darteed ayay ciidda kirismasku sadankaanna u noqonaysaa mid ka duwan sidii caadiga ahayd. Halista loogu jiro in culaysku xad-dhaaf ku noqdo laamaha caafimaadka iyo faafidda fayraska la kala qaadi og yahay ee omikoroon ayaa lagama maarmaan ka dhigaya tillaabooyin cusub oo adag si loo yareeyo xiriirka dadka, ayuu yiri raysul wasaare Jonas Gahr Støre.

Tallaallada ayaa marka danbe difaaca jirka sare u qaadi doona, ayuu yiri raysul wasaaruhu.

– Sidaas darteed ayay rajadu ku jirtaa tallaalka. Kuwiinna aan tallaalka qaadan: Qaata. Kuwiinna loo fidiyay cirbadda xoojinta ah: Qaata, ayuu yiri raysul wasaaruhu.

Waxaa dhici karta in uu culaysku aad ugu bato adeegga caafimaadka

Cadaadis weyn oo si kordhaya ayaa saaran adeegga caafimaadka ee degmooyinka iyo isbataallada. Cudurka oo sii faafa oo dadka isbataallada la dhigayo oo sii bata waxay hoos u dhigaysaa awoodda loo leeyahay daaweynta bukaanka qaba covid-19 iyo kuwa kaleba.

- Tillaabooyinka la soo rogayo ayaa hakinaya faafidda omikoroon. Hadda ma ogin in nooca omikoroon uu sii kordhin doono dhigista isbataallada. Laakiin waxay tillaabooyinku na siinayaan, wakhti aan aqoon inta hadda ka badan uga helno sida loo kala qaadi og yahay nooca omikoroon iyo halistiisa – iyo in aan helno wakhti aan dad badan ku tallaalno, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

Ayada oo ay isbataallada norwiiiga yaallaan bukaan ka badan 300 oo qaba covid-19, ayaa waxaa kale oo isbataallada yaalla bukaan badan oo qaba infakshanka marinnada hawada iyo carruur qabta fayraska RS. Marka lagu daro shaqaale badan oo jirro darteed shaqada uga maqan isla markaana aysan fududayn in la helo dad booskoodi gala ayaa ah caqabad hor taagan waxqabadka adeegga caafimaadka oo dhan. Isbataallo badan ayaa dhimay daaweyntii bukaanka ee qorshaysnayd iyo baaritaanno. Nidaamka dhakhaatiirta joogtada ah iyo dhakhaatiirta soojeedka leh ayaa ayaguna caqabado kala kulmaya waxa ay qaban karaan. Degmooyinka waxaa dheeri u ah hawlo badan oo la xiriira tallaalka iyo TISK (tijaaba-qaad, gooni u bixid, raadraacidada cudurka iyo karantiil).

Marka uu omikoroon ka daba yimid noocii delta oo aad u faafay, dadkuna ay dad badan u dhowaadaan, hawlaha TISK ee degmooyinka ayaa adkaanaya.

- Degmooyinku hadda shaqo baaxad leh oo muhiim ah ayay hayaan marka ay dadka tallaalayaan. Degmooyinka uu cudurku ka dillaacayna waxay xoog uga shaqeeyeen sidii ay faafidda u yarayn lahaayeen. Waa shaqo adag marka ay shaqaalaha iyo dadweynuhuba ku daaleen maalmo shaqo oo dhaadheer iyo safmar aan baxayn. Waan la dhacay shaqada la qabtay. Waxaa kale oo aan la dhacay dhammaan shaqaalaha adeegga caafimaadka- iyo daryeelka ee xoogga u shaqaynayay ku-dhowaad laba sano. Ma hayno cid diyaar ah oo beddesha markay nasasho u baahdaan. Dhammaanteen ayay na saamaynaysaa haddii ay shaqadu xad-dhaaf ku noqoto adeegga caafimaadka. Sidaas darteed waa in aan yaraynaa is-qaadsiinta cudurka oo culayska ka dhinnaa adeegga caafimaadka- iyo daryeelka, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelku.

Joojinta shubidda khamriga

Dawladdu mitirkii ayay hadda mar kale soo celisay, goobaha cuntada iyo cabbitaanka ayaa ka mid ah meelaha lagu soo celiyay.

- Waa muhiim in dhammaan laga fikiro tirada dadka loo dhowaanayo. Haddii aad dad badan u dhowaato, waa in aad dadkaas yaraysaa. Waxaan og nahay in ay is-qaadsiinta badankeedu guryaha ka dhacdo, sidaas darteed ayaan dadka ku boorrinaynaa in ay ugu badnaan 10 qof guryaha ugu soo martiyaan, ayuu yiri Støre.

Waxay dawladdu soo celinaysaa xeerkii ahaa in goobaha cuntada iyo cabbitaanka ee haysta shatiga khamriga in looga baahan yahay in dadku wada haystaan meel ay fadhiistaan. Khamriga waxaa lagu bixin karaa miisaska oo keliya, shubidda khamrigana waxaa la joojinayaa saacadda 24:00.

- Waan fahamsanahay in ay tani farriin aad u adag ku tahay ganacsi muddo dheer xaalad adag ku jiray. Sidaas awgeed ayayna dawladdu la imaan doontaa waxqabadyo dhaqaale, ayuu yiri raysul wasaare Jonas Gahr Støre.

Waxay sidoo kale dawladdu soo rogaysaa in meelo badan af-dabool la xirto marka aan hal mitir la kala fogaan karin, meelahaas waxaa ka mid ah dukaammada, goobaha cuntada iyo cabbitaanka iyo gaadiidka dadweynaha. Shaqabixiyaha waxaa waajib ku ah, meelaha ay suurtagalka tahay, in uu gacan ka geysto in guriga lagu shaqeeyo.

Firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay

Kjerkol waxay hoosta ka xarriiqday in fursadaha fiican ee firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay in ay micno weyn u sameeyaan caafimaadka jirka iyo midka nafsiyanka ah - waayo waxay taasi noo suurtagelisaa in aan saaxiibbadeen wakhti la qaadanno.

- Isboortiga- iyo dhaqanka abaabulan ayaa muhiim u ah carruurta iyo dhallinyarada. Dadka waaweyn laftigooda waxtar weyn bay u leeyihiin. In kasta oo faafidda cudurku keenayso in aan yarayno tirada kooxaha dadka ka weyn 20 sano, haddana shuruuddii kala fogaanshaha 1-ka mitir ku soo rogi meyno meelaha aan firfircoonida la qaban karin ayada oo la kala fog yahay. Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano ma soo jeedinayno tiro loo baahan yahay in aan laga badan marka ay tababbaranayaan oo ka qaybqaadanayaan isboortiga-, dhaqanka- iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay. Sidoodii ayay weli u wada tababbaran karaan - ayay tiri Kjerkol.

- Waa muhiim in dadku isu tagaan, laakiin waa in aan yaraynaa tirada dadka aan u dhowaanayno. Dadka gooni uga bixi meyno haddii aan cudurka nagala helin. Mararka ay suurtaggalka tahayna dibedda ayaan dadka kula kulmaynaa, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelku.

Waa kuwan talooyinka heerka qaran ah

Talooyin iyo soo-jeedinno

Kala fogaanshaha iyo isu-imaanshaha dadka

- Waxa wacan in qof kasta 1 mitir ka fogaado dadka kale marka laga reebo dadka guriga la deggan iyo dadka xidhiidh kale oo dhow kala dhexeeyo.
- Soo-jeedinnadu ma khuseeyaan carruurta aadda xannaanooyinka carruurta iyo dugsiyada hoose. Waxa kale oo laga reebay dadka waaweyn ee ka shaqeeya adeegyada loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada iyo dadka nugul.
- Ma wacna in guriga lagu casuumo marti ka badan 10 qof marka laga reebo dadka guriga deggan. Ilaa 20 qof oo marti ah ayaa guriga lagu casuumi karaa hal mar oo ka mid ah ciidaha kirismaska iyo sannadka cusub, laakiin waxa wacan in martidu hal mitir kala fogaato. Qof kastaa ha ka fekero inta qof ee uu guud ahaan u dhawaanayo.
- Carruurta aadda xannaanooyinka carruurta iyo dugsiyada hoose waxa soo booqan kara carruurta ka tirsan kooxdooda/fasalkooda/qaybtooda inkastoo tiradu dhaafayso tirada martida ee lagu talinayo in aan la dhaafin.
- Yaree tirada dadka aad u dhawaanayso, laakiin dadka ha iska qoqobin.
- Dadka kale dibedda kula kulan marka ay suurtagal tahay.

Firfircoonida wakhtiga firaaqada ah ee abaabulan

- Waxa wacan in firfircoonida wakhtiga firaaqada ah lagu qabto dibedda ilaa intii ay suurtagal tahay, waxaana wacan in la xidho qolalka dhar beddelashada.

- Marka gudaha lagu qabanayo firfircoonida wakhtiga firaaqada ah ee abaabulan waxa la soo jeedinnayaa in dadka waaweyn ee 20 sano ka weyn loo qaybiyo kooxo midkiiba yahay ugu badnaan 20 qof. Waxa kale oo la soo jeedinnayaa in dadka waaweyni marka ay gudaha joogaan ay kala fogaadaan haddii ay suurtagal tahay in firfircoonida la sameeyo inkastoo la kala fog yahay, iyo in 2 mitir la kala fogaado marka la samaynayo jimicsi si xoog ah loo samaynayo.
- Ma jirto wax soo-jeedin ah oo ku saabsan masaafada la kala fogaanayo iyo tirada dadka, marka ay carruur iyo dhallinyaro ka yar 20 sanno samaynayaan jimicsi ama ka qaybgalayaan firfircoonida isboortiga, dhaqanka ama wakhtiga firaaqada ah.
- Ciyaaraha heerarka sare waxa loo qaban karaa si caadi ah.

Iskuullada, xannaadooyinka carruurta iyo SFO-yada

- Tijaabo-qaadista iskuullada oo la joogteeyo marka is-qaadsiintu badan tahay.
- Degmooyinku haddii loo baahdo waxa ay markale isticmaalayaan nidaamkii ku salaysnaa midabyada nalka taraafikada ee loogu talagalay iskuullada iyo xannaanooyinka. Hadda waxa lagu jiraa heerka cagaarka ah, haddii aanu jirin go'aan kale oo heer deegaan ah.
- Waa la qabanqaabin karaa isu-imaanshooyin loogu talagalay carruurta xannaanooyinka iyo dugsiyada hoose oo ka kooban fasalka/qaybta/kooxda oo dhan oo ay la joogaan dad waaweyn oo tiradoodu tahay inta loo baahan yahay.
- Waxa habboon in jaamacadaha iyo dugsi-xirfadeedyadu ay sida ugu dhakhsaha badan ee macquul ah bilaabaan cashar-bixinno ardaydu kooban tahay islamarkaana ay kordhiyaan cashar-bixinnada digitaalka ah. Marka la samaynayo cashar-bixinno goobjoogis ah waa in mudnaanta la siiyo ardayda aan ka maarmin in ay isticmaalaan laabka si ay wax u tijaabiyaan, ama u baahan in ay qataan tababar aqooneed.
- Waxa wacan in jaamacadaha iyo dugsi-xirfadeedyadu ay fududeeyaan in imtixaannada iyo koorasyada waajibka ah loo qaadan karo qaab digitaal

ah ama qaab goobjoogis ah haddii laga hortagi karo is-qaadsiinta cudurka. Sidan si la mid ah ayaa khuseysa goobaha kale ee waxbarashada dadka waaweyn.

Eeg warbixin gaar ah oo ku saabsan tallaabooyinka iskuullada/xannaanooyinka carruurta iyo waxbarashada sare.

Shaqooyinka

- Soo-jeedin ku saabsan in 1 mitir la kala fogaado iyo in la kordhiyo in guryaha lagu shaqeeyo.
- Soo-jeedin ku saabsan in la xidho af-dabool haddii aan la kala fogaan karin, marka aan la isticmaalin waxyaallo dadka kala qaybinaya sida gidaarrada qoqobida ama wax la mid ah.
- In guriga lagu shaqeeyo iyo af-daboolku ma khuseeyaan adeegyada ay caqabad ku noqonayaan in shaqaaluhu gutaan hawlhooda lagama maarmaanka ah ee sharcigu ku waajibiyay, marka ay u shaqaynayaan dadka nugul iyo carruurta iyo dhallinyarada.

Layrin

- Waxa la soo jeedinnayaa in si wacan loo layriyo qolka marka hal qol muddo dheer lala joogo dad aan guriga degganayn ama aan lala lahayn xidhiidh kale oo dhow.

Tallaabooyinka xeer-hoosaad ku soo baxay

Qabanqaabooyinka iyo isu-imaanshooyinka

- Ugu badnaan 20 qof ayaa joogi kara qabanqaabooyinka gaarka ah ee ka dhacaya goob dadweyne, goob la kiraystay ama la ammaanaystay
- Kulammada tacsida ah ee ka dambeeya aasaska waxa joogi kara ugu badnaan 50 qof. Aaska waxa loo arkaa qabanqaabo guud oo qofku haysto goob la fadhiisto oo joogto ah, hoos eeg.
- 3 kooxood oo midkiiba yahay 200 qof islamarkaana 2 mitir markasta u dhaxayso kooxaha ayaa loo oggol yahay qabanqaabooyinka guud ee dadku haystaan goobo fadhi oo joogto ah.

- Ugu badnaan 50 qof ayaa joogi kara qabanqaabooyinka guud ee dadku aanay haystan goobo fadhi oo joogto ah.
- Marka la qabannayo qabanqaabo gudaha ah waa in la doorto qabanqaabiye masuul ka noqonaya in la ogaado dadka goobta joogay islamarkaana ilaaliya in qabanqaabadu u dhacayso si waafaqsan ka hortagga is-qaadsiinta cudurka.
- Qabanqaabooyinka khamriga bixin kara waa inay bixinta khamriga joojiyaan saacadda 24:00.
- Qabanqaabiyuhu waa inuu ilaaliyo in dhammaan dadka jooga qabanqaabo gudaha ahi ay ugu yaraan 1 mitir ka fogaadaan dadka kale ee aan guriga la degganayn ama aan xidhiidh kale oo dhow ka dhaxaynin. Kooxo dad ah ayaa tan laga dhaafayaa, oo ay ka mid yihiin dadka soo bandhigeysa qabanqaabooyinka dhaqanka iyo isboortiga ah, ka qaybgalayaasha koorasyada qaarkood iyo carruurta xannaanooyinka iyo dugsiyada hoose ee ka wada tirsan koox joogto ah.
- Qabanqaabooyinka ay dadkoo dhan fadhiyaan goob joogto ah waxa kala fogaansho ahaan ku filan in qabanqaabiyuhu diyaariyo in ugu yaraan hal kursi oo bannaan u dhexeeyo dadka isku safka ah, laga bilaabo marka ay yimaadaan qabanqaabada. Dadka hal guri wada deggan way isu soo dhawaan karaan ka dib marka ay yimaadaan.

Goobaha cuntada iyo cabbitaanka

- Waajib ku saabsan in goobaha cuntada iyo cabbitaanku ay ilaaliyaan in qof kasta ugu yaraan 1 mitir ka fogaado dadka kale ee aan guriga la degganayn ama aan xidhiidh kale oo dhow ka dhaxaynin. Waa in ugu yaraan 1 mitir u dhexeeyo kuraasida martidu fadhiisanayso marka ay timaado, laakiin haddana waa la oggol yahay in dadka hal guri wada deggani isu soo dhawaan karaan.
- Goobaha cuntada iyo cabbitaanka ee khamriga bixin kara waa in ay goobo la faadhiisto siiyaan martida oo dhan, laakiin shardigan waa laga dhaafay marka qabanqaabo dhaqameed lagu qabanayo goobta cuntada iyo cabbitaanka.
- Khamriga waxa dadka loogu geyn karaa miisaska oo keliya.

- Bixinta khamriga waa in la joojiyo 24.00.
- Goobta cuntada/cabbitaanku waa inay diiwaangeliso macluumaadka meelaha lagala xidhidhi karo martidooda, intii oggolaata.

U shaqaynta hab waafaqsan ka hortagga is-qaadsiinta

- Waajib ku saabsan in loo shaqeeyo hab waafaqsan ka hortagga is-qaadsiinta cudurka oo loogu talagalay xannaanooyinka carruurta, iskuullada iyo goobaha kale ee tababbarrada iyo waxbarashada. Waa in degmooyinku soo celiyaan isticmaalka nidaamka ku salaysan midabyada nalka taraafikada. Heerka tallaabooyinku waa cagaar haddii aanu jirin go'aan kale oo heer deegaan ah. Waxa iman karta in dhammaan xannaanooyinka carruurta iyo iskuullada waddankoo dhan la geliyo heerka huruudda ah.
- Goobahan/meheradahan ayaa laga rabaa in ay hawlahooda u gutaan si waafaqsan ka hortagga is-qaadsiinta cudurka si ay u sii furnaan karaan: Maktabadaha, goobaha dalxiiska iyo madaddaalada, hoolasha dabaasha, *badeland*, dabaasha hoteellada, goobaha jimicsiga, hoolasha bingada, hoolasha ciyaaraha khamaarka, suuqyada waaweyn, dukaammada, bandhigyada badeecooyinka, suuqyada aan rasmi ahayn iyo waxyaalaha la midka ah.
- Arrintan waxa la socda shardi ah in la ilaaliyo in qof kasta ugu yaraan 1 mitir ka fogaan karo dadka kale ee aan guriga la degganayn ama aan xidhiidh kale oo dhow ka dhaxaynin, iyo in goobtu diyaariso nidaamyo loogu talagalay in lagu ilaaliyo fayodhowrka, nadaafadda goobta iyo layrinta.
- Maktabadaha, dukaammada iyo suuqyada waaweyn mooyaane, waa in goobuhu diiwaangeliyaan macluumaadka meelaha lagala xidhidhi karo dadka soo booqday, intii oggolaata.
- Waxa wacan in hageyaashii u gaarka ahaa noocayada meheradaha dib loogu soo rogo meelaha ay ka mid yihiin xarumaha jimicsiga iyo hoolasha dabaasha.

Af-daboolka

- Af-daboolku waa waajib marka aan ugu yaraan hal mitir la kala fogaan karin ee la joogo dukaammada, suuqyada waaweyn, goobaha cuntada iyo cabbitaanka, gaadiidka dadweynaha, gudaha goobaha laga raaco gaadiidka dadweynaha iyo taksi. Waajibku wuu khuseeyaa xataa shaqaalaha haddii aan loo dhaxaysiin wax kala xidha.
- Waajibka xidhashada af-daboolku wuu khuseeyaa timo-jareyaasha, jidh-daryeelayaasha ama meheradaha kale ee hal qof hal qof u adeegayo.
- Waxa jira soo-jeedin heer qaran ah oo ku saabsan in af-dabool la xirto marka la joogo meel dadku ku badan yahay islamarkaana ay adag tahay in la kala fogaado, sida marka qabanqaabo laga baxayo oo ay dad badan mar jaakadaha soo wada qabsanayaan oo kale – ama marka laga baxayo garoon kubbad cag oo kale.

In guriga lagu shaqeeyo

- Waajib ku saabsan in goobta shaqadu ay shaqaalaha u fududeeyaan in ay guriga ku shaqeeyaan marka ay suurtagal tahay oo aanay wax u dhimayn adeegyada joogistu shaqaaluhu muhiim iyo lagama maarmaan u tahay hawlaha goobta shaqada, tusaale ahaan marka la daryeelayo carruur ama dadka nugul.

Karantiil

- Karantiilkii waajib ku noqonayay dadka u dhawaaday qof cudurka laga helay oo lagana shakisan yahay in uu qabo omikeroon, waxa uu hadda waajib ku noqonayaa xataa dadka kale ee qofka u dhawaaday, oo maaha keliya dadka qofka guriga la deggan ama la leh xidhiidh kale oo dhow.